

KU DHAQAN XAFIIS D.



Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I

Muqdisho, 12 Agosto 1973

L. 16

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddeddaa waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W. M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADED

**XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 28 Luuliyo 1973 — Magacaabid Idhaaroyin
Guddiyo. L. 81.**

Bog. 275

**XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 1 Agosto 1973 — Magacaabid ku meel Gaar
ah iyo Dallacaad Jaalle Dr. Abdulla M. Xasan.
L. 82.**

» 276

**XEER WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA, 1 Agosto
1973 — Dad laga saari Guddi uu ka ahaay Idaarad.
L. 83.**

» 277

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 4 Luuliyo
1973 — Siismo Dhul Dowlaadeed la siyey Xajia Xalima
Cusman. L. 84.**

» 278

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 4 Luuliyo
1973 — Siismo Dhul Dowlaadeed la siyey Maka Shekh
Cusman. L. 85.**

» 279

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSHIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19 Majo 1973 — <i>Digniin Jaalle Fadula Cumar Moxamed.</i> L.120.	Bog. 281
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Luuliyo 1973 — <i>Naado Dhul, Cusman Dirshe Sobrie.</i> L.121.	» 281
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Luuliyo 1973 — <i>Naado Dhul, Moxamed Xassan Cali.</i> L. 122.	» 282
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Agosto 1973 — <i>Naado Dhul, Xusseyn Moxamed Xabib.</i> L. 123.	» 282
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Luuliyo 1973 — <i>Naado Dhul Cabdullahi Gaahir Gedi.</i> L. 124.	» 283
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Luuliyo 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Xaji Cabdulle Nur.</i> L. 125.	» 283
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Luuliyo 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Cabdulla Salax Cabdalla.</i> L. 126.	» 284
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Luuliyo 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Axmed Cali Cilmi.</i> L. 127.	» 284
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Xassan Xaji Moxamed Farax.</i> L. 128.	» 285
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Abshir Kaahiye Farax.</i> L. 129.	» 285
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Axmed Moxamud Warsame.</i> L. 130.	» 286
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Casha Moxamed Gelle.</i> L. 131.	» 286
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Jamac Axmed Guled.</i> L. 132.	» 287
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Agosto 1973 — <i>Baddalaad Naado Dhul, Comar Xaji Jamac.</i> L. 133.	» 287
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Marso 1973 — <i>Naado Dhul Cisman Xassan Gaabow.</i> L. 134.	» 288
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Juunyo 1973 — <i>Naado Dhul, Macalim Moxamed Isaaq.</i> L. 135.	» 288
BANGIGA UMMADDA SOMALIYEED, 16 Luuliyo 1973 — <i>Xeerka Sarrijka Lacagaha Qalaad.</i> L. 136.	» 289
BANGIGA UMMADDA SOMALIYEED, 6 Agosto 1973 — <i>Xeerka Sarrijka Lacagaha Qalaad.</i> L. 138.	» 291
AFRICAN MOTOR & ENGINEERING Co. Ltd. (AMECO) S. p. A. 14 Agosto 1973, — <i>Isuumaatin Guudnimo oo</i>	» 292

BOGGA KOOWAAD SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAH A GOLAH SARE EE KACAANKA

28 Luuliyoo 1973, L. 81.

Magacaabid Idaarooyin Guddiyo.

GUDDOONSHAH A

ASAGOO ARKAY Xashidii 1da iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Oktober 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 8d iyo kan 10d ee Xeerka lambar-kiisu yahay 52 oo la soo saaray 8dii bisha junyo 1972;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabs in Guddiyada Gobolaada iyo kuwa Degmooyink ay ka mid noqdaan dad ka socda Bangiyada Wad-danka;

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1d

In idaarooyinka Guddiyada Gobollada iyo kuwa Demooyinka uu ka mid noqdo qofka madaxda ka ah Bangiga ka dhisan Gobolka amma Degmada.

Qodobka 2d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28 Agosto 1973.

GIDDOOMIYAH A
COLLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Xogmayaha Dawladda eee
Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Kusime)

S. Gaas Moxamed Siyad Barre

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 93.

Mogadiscio, li 2 Agosto 1973.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDIULLAHI WARSAME NIJIR

XEER GUDDOONSHAH A GOLAHA SARE EE KACAANKA

1 Agosto 1973, L. 82.

Magacaabid ku meel gaar ah iyo dallacaad Jaalle Dr. Cabdullahi Maxamed Xasan.

**GUDDOONSHAH A
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

ASAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 29 soo baxay 1 abrile 1970 ee Shaqaalaha Dawladda iyo isbeddelakii lagu sameeyey;

ASAGOO ARKAY Xeerka tiraddisu tahay 166 ee soo baxay 17 Sebtembar 1972 kuna saabsanaa dhismaha Xafiiska Garyaqaaanka Guud ee Dawladda;

ASAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 14 ee 3dii June 1962 kuna saabsanaa «Organisation of the Government».

**WUXUU XEERAYAA
Qodobka 1aad**

Marka laga bilaabo bisha Luliyo 1da 1973, Dott. Cabullari Maxamed Xasan waxaa lagu magacaabay ku meel gaar ahaan ku Xiggeenka Garyaqaaanka guud ee Dawladda wuxuuna buuxinayaajagada A-3 lamb. 1.6101, iyadoo darajadiisa ay ncqodoonto A-8 isla markana xaq wuxuu u yeelanaya abaalgudka alaunces la siiyo Agaasimaha.

Qodobka 2aad

Waxaa lacagta laga siin doona miisaniyadda u taal Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka oo uu haatan lacagta ka qaato.

Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre
**GUDDOONSHAH A
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Jaalle Maxamed Yusuf Wayrax
Xoghayaha Wasaaradda Lacagta

VISTO e registrato - Reg. n. 3, foglio n. 59.

Mogadiscio, li 5 Agosto 1973.

Il Magistrato ai Conti:

M. ABDOULLAH HUSSEIN WARNAME NUU

XEER WASAARADDA ARRIMAH A GOLAHA

1 Agosto 1973, L. 83.

Dada laga saari Gudi uu ka ahaay Idaarad.

WASAARADDA ARRIMAH A GUDAHA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21ka Oktober 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 10d ee sharciga la soo saaray 8d Junyo 1972 lambarkiisuna yahay 52.

ASAGOO ARKAY Ra'yigii uu soo jeediyay Guddoomiyaha Guddiga Gobolka Hiran ee ku qoraa warqadda lambarkeedu yahaya 490-73 ee 29kii bisha majo 1973;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in Cali Xasan Sabriye iyo Moxamed Sabrie Cbdi laga saaro Guddiga Degmada Degmada Beled Wyne oo hore ay uga ahareen Idaaro sababuhuna yihin kuwa lagu sheegay warqadda kor ku qoran ee Guddoomiyaha Guddigz Gobolka Hiran, isla markaassa bedelkoodii lagu magacaabo Jaalleyaasha ah Ibrahim Moxamed Cabdille iyo Sheekh Moxamed iyo in jaalle Nur Diiriye Bullow lagana oogolaado istiqaladii uu ka keenay ka mid ahaanta Guddiga Degmada kor lagu sheegay isla mar ahaantana lagu bedelo Jaalle Cabdi Dhaahir Cusman (Cabdi Gurey).

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1d

No. 1 — In Cali Xasan Sabriye iyo Moxamed Sabriye Cabdi laga saaray Guddiga Degmada B. Weyne bedelkoodina loo magacaabay in ay isla Guddiga ka mid noqdaan Jaalleyaasha ah: Ibrahim Moxamed Cabdille iyo Sheekh Moxamed Nur Moxamed.

No. 2 — In Jaalle Nuur Diiriye Bullow laga oggolaaday istiqaladii uu ka keenay ka mid ahaanta Guddiga Degmada B. Weyne bedelkiisina loo magacaabay in uu Guddiga ka mid noqodo Jaalle Cabe Dhaahir Cusman oo lo yaqaan Cabdi Gurey.

Qodobka 2d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Agosto 1973.

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimada Gudaha
S. Gaas Xusen Kulmie

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 91.

Mogadiscio, li 2 Agosto 1973.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

4 Luuliy 1973. L. 84.

Siismo dhul dawladeed la siyey Xaja Xalima Cusman Dhiblaue.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
QAYBTA DHISMAHA IYO DHULKA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kaanca iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Xajia Xalima Cusman Dhiblaue taarikhdeeduna aheyd 12-4-1972, kuna yaal Jidka Welio Cadde;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadli dhulka ee lagu dhejiyey xafiska ku shaga lahaa laguna dabacay hashida rasmiga ah ee dawladda L. 44 taarikhdeeduna aheyd 29-4-1972;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolanshihi guddiga farsamada dhismaha uu ku saabsanet naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 10016 bishi 6 Settembre 1972 soona gudubtay fadhibgii 7° aad 22kii Marzo 1973;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu ahey L. 66152 taarikhdeeduna 7-10-1972; in Xajia Xalima Cusman Dhiblaue uu dhibtay xafiska Canshuurta dawladda lacagta tiradeedu tahay Sh. So. 2,287,55;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay MW-3-23-1248 taarikhdeduna 2 Novembre 1972 in nagta kor ku magacaaban la siyey dhulku fadhiyaa 693;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qanunka siismada dhuliyo naqshadda oo tilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashada hobsinada dhulka ay qortay xafiska farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, tarikhdeeduna aheed 23-6-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay xafiska ku shaga leh L. 4481 tarikhdeeduna aheyd 30 Majio 1973 oo cadeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO AQOONSADAY In waajibatkeyda innu ka bahday nagta kor ku soo shegnay;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda shaa Lambarkiisu WMG-3-23-307 taarikhdeeduna aheyd 19-3-1973 — ku saabsan lacag celis;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Xajia Xalima Cusman Dhiblaue la siiyey dhul dawladeed ee ku fadhiya 693 mdh., kuna yeal Muqdisho — Jidka Walio Cadde.

Muqdisro, 4 Luuliyo 1973.

XOGHAYAHA WASAARADDA H. G.
Cashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 32.

Mogadiscio, li 12 Luglio 1973.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

4 Luuliyo 1973, L. 85.

Sismo dhul dawladeed la siyey Maka Shekh Cusman.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

QAYBTA DHISMAHA IYO DHULKAA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kaacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Mak Shekh Cusman taarikhdeeduna aheyd 20-6-1964, kuna yaal Jidka Welio Cadde;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey xafiska ku shaga lahaa, laguna dabacay hashida rasmiga ah ee dawladda L. 4-4 taairkhdeeduna aheyd 29-4-1972;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsanet naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 10015 bishii Settember 26k soona gudubtay fadhibgii 7° aad 22kii Marso 1973;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ha tiradedu aheyd L. 66151 tarikhdeeduna 7-10-1972 iyo L. 86451 tarikhdeeduna 20-3-1973 in Maka Shekh Cusman uu dhibtay xafiska Canshurta dawladda lacagta tiradeedu tahay Sh. So. 2, 322,00;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siisamaha dhulka iyo lambarteda yahay MW-3-23-1249 in lagta kor. ku magacaaban la siiyey dhulku fadhiyay 774;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qanunka siisamaha dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashada hobsinada dhulka ay qortay xafiska farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeed-duna aheyd 23-6-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay xafiska ku shaqa leh L. 4482 taarikhdedduan aheyd 30 Mjio 1973 oo cadeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

IYADDO AQOONSADAY In waajibatkeyda innu ka bahday naqta kor ku soo shenay;
DrmddWGf

AMAR XEER

Waxan la caddeynayaa in Maka Shekh Cusman la siiyey dhul daw-ladeed ee ku fadhiya 774 mdh., kuna yaal Muqdisho — Jidka Welio Cadde.

Muqdisho, 4 Luuliyo 1973.

XOGHAYAHA WASAARADDA H. G.
Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 34.

Mogadiscio, li 12 Luglio 1973.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

D I G N I I N

Waxaa lo sheegaya Dhammaamba dadka deggen Magaaladda Baydhaba in aanu soo dhejiney digniin ka wuxuu ku saabsanyahay dhul u soo weydistay in ay gadato Jaalle; Fadula Cumar Moxamed oo dhulka wuxuu ku yaala gidka dhiniciisa, taas oo ku tussalsenyo Nakhshadoinka dhulka) oo yaal Xafiiska Guddomiyaha Guiddiga Degmada Baydhaba.

Dadka ai dani ugu girta dhamaamba waxaa loo sheegahayaa in ay war fax Faahin ka Helidoonaan Xafiiska Guddomiyaha Guiddiga Degmada Baydhaba.

Baydhaba, 19 Majiyo 1937da.

*Gashanle: Cabdulqadir Cabdulle Berkan
Guddomiyaha Guiddiga Degmada Baydhaba*

L. 120

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cusman Dirshe Sobriye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18-7-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardigley, oo leh qiyaas Afar gees isle'eg, kuna fadhiya $20 \times 18 = 360$ mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Dahabo Barkadle; Gelbeed Jid: Bari Casha Mox'ud Cilmi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo ee Dhulka ee Wasaaradda Hawla Ha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), ee laga bilaaba maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A P A P B H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Xasan Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 11-6-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Mudisho xafadda Hodan, oo leh qivaas rektangular (27x13,50) kuna fadhiya 364.50 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Moxamed Cusman.

Qofkii dannaynayaan wuxuu si fiican uga arki naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo ee Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), ee laga bilaaba maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muddisho, 31 Luliyo 1973.

(122) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A B H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Huseyn Moxamed Xabib u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 20-3-1967, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowlaadeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21ka Oktobar, oo leh qiyas rektangular, kuna fadhiya $30 \times 20 = 600$ mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul L. 740; Koofur Jid; Galbeed Dhul L. 746; Bari Dhul L. 748.

Qofkii dannaynayaaw wuxuu si fiican uga arki naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo ee Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), ee laga bilaaba maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Moqdisho, 9 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayay in Jaalle Cabdullahi Gaahir Gedi, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 23-7-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowlaadeed kuna yaal Muqdisho xasadda Jidka Afgoye, oo leh qivaas rektangular (50x7), kuna fadhiya 350 mdh.

Soohdin: Waqooyi GL 129-73 iyo 1826-68; Koofur GL 280-60; Galbeed GL 531-60; Bari GL 544-59.

Qofkii dannaynayaaw wuxuu si fiican uga arki naqashadda dhulka oo taal Qayba Dhismaha iyo ee Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), ee laga bilaaba maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Moqdisho, 9 Agosto 1973.

(124) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

WASAAPADDA HAWLAHA GIUD

BADDALAAD NAADO DHUL JU LAHANJIRAL

Jaaalle Xajji Cumar Cabdulle, ku vaal degmada Baydhoba

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku fadhiyyay 900 mdh, ee lagu soo diray warqada lam. MW-3-23-650 ee 28 Agosto 1972.

Waxaan idin caddeynaya in dhulka isaga ah uu la wareegay Jaalle Warsama Axmed Nur (dys) waxuuna ku fadiyya mt. 30x52 la mid ah 1560 mdh., ee aan ahayn sadii horay ee kor anuu ku sheegnay soohdimahiijuna waa:

Waquooye Jid; Koofur guriga Axeme ,Axaaf); Galbeed P. R.; Bari Jidka u baxa Xama.

Baydhoba, 21 Agosto 1973.

Gashanle waxaa saxiixay
Cabduqadir Cabdulle Berkan
Guddomiyaha guddiga degmada Baydhobo

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddaalad naado dhul uu leyahay Jaalle Cabdalla Salax Cabdalla
ku yaal 21 Oktobar*

Jaallaha kor ku magacaban, oo horay loo naadahay dhul ku fadhiye a 1200 mdh., ee laguna soo diray warqadda tiradeedu aheed MW-3-23-1048 ee 12 Settember 1972, waxaa la caddeynaya in dhulka isaga ah waxuu dhanyahay mdh., 1626 ee aan ahayn sadii hore ee kor ku dhigan, sohdimahisuna waa sadii hore ee loo soo sheegay.

Muqdisho, 31 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(126)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Axmed Cali Cilmi kuna
yaal Muqdisho, xafadda Wardhikley — T. G. N. 758-67.*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Wardhikley, kuna fadhiya 2.500 mdh., waxaa la caddeynaya in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 758-2227-68 — 21-9-1968, waxay isku paddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Octobar, waaaxuuna leeyahay qiyas rektangular 30x20, oo ku fadhiyaa 600 mdh., soohdin waxuu ia leeyahay;

Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 596; Galbeed dhul L. 587; Bari dhul L. 589.

Muqdisho, 31 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

(127)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Xasan Xaji Moxamed Afrah kuna Muqdisho, xafadda Via per Afgoi — T. G. N. 1142-68.

Jaallhaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Jidka Afgoye, kuna fadhiya 3000 mdh., waxaa la caddeynaya in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 1142-1768 ee 11-8-1968, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyas Rextangular, oo ku fadhiyaa 600 mdh., sooh-din waxuu la leeyahay;

Waquooyi Dhul L. 411; Koofur Jid; Galbeed dhul L. 417; Bari dhul L. 419.

Muqdisho, 6 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(128) *Moxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Abshir Kaahiye Farax kuna yaal Muqdisho, xafadda V. Nord — T. G. N. 127-66.

Jaallaha kor ku gamacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Valle Nord, kuna fadhiya 600 mdh., waxaa la caddeynaya in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 932286 ee 23-5-1966, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyas Rektangular, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., sooh-din waxuu la leeyahay;

Waquooyi Jid; Koofur Dhul L. 149; Galbeed Dhul L. 120; Bari Dhul L. 147.

Muqdisho, 6 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(129) *Moxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Axmed Moxamuud Warsama ku yaal Muqdisho axafadda Shibus — T. G. N. 120- 61.

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo naadahay dhul ku fadhiya 1440 mdh., ee lagu soo diray warqadii tiradeedu ahayd MWD 120-949-68 ee 16-6-1968, waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga waxuu dhanyahay mt. (24x24) + (24x24) = mdh. 1152, mid kastana waa 4 gxs, Jid, ayaa ka mara ee aan aheen sadii hore anuu soo sheegnay, sohdimahisuna waa jidad.

Muqdisho, 6 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(150) *Moxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leelayahay Jaalle Casha Moxamed Gelle, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Wadada Afgoye — T. G. N. 1096-68.

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Wadada Afgoye.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 1096-2091-68 ee 14-9-1968, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna lee yahay qiyaas rettangolare (40x30), oo ku fadhiya 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqqooyi Jidka 21ka Oktobar; Koofur Dhul L. 569 iyo 570; Gaaleed dhul L. 562; Bari Jid.

Muqdisho, 7 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(151) *Moxamed Cabi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Jama Axmed Guled, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Halane iyo C. Latte — T. G. N. 757-66 iyo 1766-66.

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho Xafadda Halane, kuna fadhiya 3365 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 1766-2102-68 iyo BF-757-2269-67 ee 14Settembre 1968 iyo 8-8-1976, waxay isku baddashay sida soo socota.

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas Rektangular, oo ku fadhiya $40 \times 30 = 1200$ mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Dhul L. 359 iyo 360; Koofur Jid; Galbeed Dhul L. 366 Bari Dhul L. 369.

Muqdisho, 11 Agosto 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(152) Moxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Comar Xaji Jamac kuna yaal Muqdisho, Xafadda Halane — T. G. N. 998-67,

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Halane, kuna fadhiya, waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 998-14332 ee 22-9-1968, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular, oo ku fadhiya $30 \times 20 = 600$ mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Jid. Koofur Dhul L. 273; Galbeed Dhul L. 266 Bari Jid.

Muqdisho, 12 Agosto 1973.

XAFIISKA GUDDOMIYAH G. DEGMADÄ

OGEYSIIS DADWEYNAHA

Waxaa la ogeysiinaya dadweynaha degaa Magaaladda Kismayo, in Jaalle Cisman Xasan Gaabow, oo soo weydiistay dhul tarariikhdu markay ahed 10-3-1973, oo ah meterkiis 28x40, kuna yaal Xafadda Farjano.

Waxaa la codsanaya qofkii dacwad ka qaba inuu 30 maalmood ku soo dacwoodaa u na soo diraa Xafiska Guddomiyaha Guddiga Degmeda, haddii kale dhulka xaq waxaa loo siinayaas Jaallaha kor ku magacaaban

GUDDOMIYAH G. DEGMADA

Wa Saxixay - S. hay L. Xidigle

Cisman Nuur Cabdi

Moxamed Cabdi Saciid

(134)

DEGMADA BAYDHABO

Waxaa loo shegayaa dhamaanba dadka degen agaaladda Baydhabo in aanu soo dejinay dikninkaas ee uuna deganaan doono 30 (Soodon) casho, diknink ku saabsan dhul uu soo weyistay in uu gato Jaalle Maccalin Moxamed isaq dhulka wuxuu ku yaal degmada Baydhabo, taasoo idiicaddeyneysa warqadaha nakh shada dhulka oo yaal Xafiiska Guddonshaha Guddiga Degmada Baydhabo.

Dadka ay dani ugu jirto dhammaamba waxaa loo sheeganayaa in ay war fahfaahim ah ka heli karaan Xafiiska Guddomiyaha Degmada Baydhabo.

Baydhabo, 28 - 6 - 1973.

Guddomiyaha Guddiga Degmada Baydaba
Gashanle W. saxixay
Cabdulqadir Cabdulle Berkan

(135)

BANGIGA UMMADDA SOMALIYEED

XEER LAMBAR 42 EE 16-7-1973

Xeerka Sarriifka Lacagaha Qalaad

TALIYAH A KUMEEL GAARKA AH

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad qaybta 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Maamulaha Guud markuu maqanyahay Taliyaha.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 26kii Settembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktobar 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO OGSOON Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Ururka Lacagaha Adduunka, ee si rasmi ah u soo ogeysiyyey Bangiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO ARKAY Go'aanka degdegta ah Lr. 123 ee 16 Luulyo 1973, uu qaatey Guddiga Maamulka la'aantiis, asago u cuskanaya qodobka Lr. 12 qaybta 4aad Amarka Lr. 6 ee 19kii Oktobar 1968, laguna beddelay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar 1968.

WUXUU GOOYHEY

(Qodobka 1aad)

Xeerka sarrifka lacagaha qalaad ee lagu caddeeyey kuwa Lr. 5 ee 13 Maars 1967, Lr. 8 ee 27 Nofembar 1967, Lr. 13 ee 19 Luulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktoobar 1969, Lr. 21 ee 11 Maajo 1971, Lr. 22 ee 19 Maajo 1971, Lr. 24 ee 27 Agoosto 1971, Lr. 27 ee 22 Disembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannaayo 1972, Lr. 32 ee 4 Luulyo 1972, Lr. 34 ee 27 Nofembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febraayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febraayo 1973, Lr. 39 ee 6 Maars 1973, Lr. 40 ee 19 Maars 1973 iyo 41 ee 17 Abril 1973, waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran marka laga bilaabo 17

<i>Lacagaha galaad</i>		<i>Iibsashada oo Shilin ah</i>	<i>Gadidda o Shilin ah</i>
US \$	1.00	6.1704	6.2327
UK £	1.00	15.3369	15.6467
Lit.	92.36	1.0000	—
Lit.	90.68	—	1.0000
D. M.	1.00	2.5705	2.6225
F. F.	1.00	1.4876	1.5176
B. F.	1.00	0.1698	0.1732
D. F.	1.00	0.0380	0.0388
K. Sh.	1.00	0.8982	0.9163
T. Sh.	1.00	0.8982	0.9163
U. Sh.	1.00	0.8982	0.9163

Xeerkan waxaa lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamihiuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, wuxuu hirgeli doona 17-7-1973.

CUMAR AXMED CUMAR
Maamulaha Guud
Kumeel gaar Taliyc

(136)

BANGIGA UMMADDA SOMALIYEED

XEER LAMBAR 43 EE 6-8-1973
Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad (I. R. iyo SW. Fr.)

TALIYAH A IYO MAAMULAH GUUD EE
BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Amarka Lr. 12 ee 2okii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktobar, 1964, kuna saabsan Xeefka u degsan Daadhiinta Ganacsiga Dibedda, ee awood sinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, inuu caddeeyo marwaiba qimma-ha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagtcenna.

AYAGOO OGSOON Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacaganaa qaar ka mid ah waddamada ku jira Uuruka Lacagaha Adduunka, ee si

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna. rasmi ah u soo ogeysiiley Bankiga Qaraniia Soomaaliyeed.

AYAGO ARKAY Go'aanka degdegta ah Lr. 124 ee 6 Agoosto 1973, ay qaateen Guiddiga Maamulka la'aantiis, ayagoo u cuskanaya qodobka Lr. 12 qaybta 4aad Amarka Lr. 6 ee 19kii Oktobar 1968, laguna beddelay Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembear 1968.

WUXUU GOOYEY

(Qodobka 1aad)

Heerka sarrifka lacagaha qalaad (I.R. iyo SW. Fr.) ee lagu caddeeyey kuwa Lr. 5 ee 13 Maarsio 1967, Lr. 8 ee 27 Nofembar 1967, Lr. 13 ee 19 Luulyo 1969, Lr. 18 ee 27 Oktobar 1969, Lr. 21 ee 11 Maaajo 1971, Lr. 22 ee 19 Maaajo 1971, Lr. 24 ee 27 Agoosto 1971, Lr. 27 ee 22 Disembar 1971, Lr. 29 ee 9 Jannaayo 1972, Lr. 32 ee 4 Luulyo 1972, Lr. 34 ee 27 Nofembar 1972, Lr. 35 ee 6 Febraayo 1973, Lr. 37 ee 24 Febraayo 1973, Lr. 39 ee 6 Maarsio 1973, Lr. 40 ee 19 Maarsio 1973, 41 ee 17 Abril 1973 iyo Lr. 42 ee 16-7-1973, waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran, marka laga bilaabo 6da Agoosto 1973.

<i>Lacagaha galaad</i>	<i>Iibsashada oo Shilin ah</i>	<i>Gadidda oo Shilin ah</i>
Indian Rupee 1.00	0.8325	0.8493
Swiss Franc 1.00	2.1385	2.1817

Heerkän waxaa lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliyeed, wuxuuna hirgeli doonaa 6-8-1973.

Muqdisho, 6-8-1973.

CUMAR AXMED CUMAR
Maamulaha Guud

CABDIRAXMAAN N. XIRSI
Taliyaha

AFRICAN MOTOR AND ENGINEERIN Co. Ltd. (AMECO) S. p. A.

O G E Y S I S

ISUIMAATIN GUUDNIMO OO CADIGA AH

Dadka kujirrah Shirkadda AMECO S.p.A. waxaa la weeydisanaya in eey ka soo qaybgalaan shir guudnimo oo caadi ah oo noqon doona Xafiska Shirkadda bisha Settembre 25da 1973 saacaddu marka eey tahay 5ta galabnimo si, looga hadlo waxyaalaha hoos kuyaalla.

- 1) — Cusbooneyn Mamulayaasha Shirkadda iyo Illaalyaasha Xisaabaadka.
- 2) Wixii kale oo soo baxa oo hadal ubaahda.

Hadii la waayo tiradii sharciga aheed, shir labaad aya lagu qaban doona isla Xafiska Shirkadda maalinta bisha Settembre eey tahay 30ka saacaddu markeey tahay 5ta galabnimo iyaddo oo laga hadli doono 2 qodob o kor ku yaallah.

Moqdisho, li 14-8-1973.

AMECO S.p.A.
Mamulaha Guud
Yusuf Nur Xassan

(138)